

A Message from

The Professional Development Team



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Xagaagii Waa La Gaadhay!

Waa wargayska sadexdii biloodlahaa ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaana loogu talo geley in cida la shaqaysa caruurta, dhalinyarta iyo qoysaska Washington oo uu ula socodsiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormar Xirfadeed](#).



Fariimahan...

- [Foolka-Fool, Tobobarka Neefka Saarida \(Cardiopulmonary resuscitation, CPR\) Ee Loo Baahan Yahay](#)
- [Khayraad Cusub Ayaa La Heleyaa - Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiyo \(frequently asked questions, FAQ\) Montessori](#)
- [Mashruuca Wacyi Gelinta Xirfadlayaasha Taageerada Qoyska](#)
- [Macluumaaadka Ugu Danbeeyay ee Labada Luuqadood](#)
- [Taageerooyinka Daryeelka Jahwareerka Laga Warqabo](#)
- [Isku Darka Nolosha Dabiiciga ah ee Banaanka ee Ku Salaysan Waxbarashada Barnaamijkaaga Waxbarashada Caruurnimada Hore \(Early Childhood Education, ECE\)](#)
- [Hambalyo Ninder!](#)
- [Waa Dr. William White, oo ka socda My Brother's Teacher](#)
- [Goobaha Tobobarka Cusub ee DCYF - Soo socda 2023!](#)
- [Dadaalka Wada Shaqaynta Hormarka Xirfadeed \(Professional Development, PDs\): Ka Qayb Gal!](#)
- [Taxanaha Webinar-ka Xagaaga](#)
- [Miyay ku dhaafeen Webinaradii Julaay?](#)
- [Tobobarada Gobolku Ansixiyay iyo Barnaamijyada Tobobarka](#)
- [Taageerada Shagaalaha ECE ee Waxbarashada](#)
- [Deegaha Waxbarashada Early Achievers: Sheeqooyinka Guulaha](#)

- [Deeqda Sinaanta Caruurnimada Hore ee DCYF - Iminka Furan](#)
 - [Cusboonaysiinta qabii](#)
 - [caLaamadayo boga intarneetka ee Professional Development \(horumarinta xirfadeed\)](#)
 - [Rukumo Fariimaha PD](#)
 - [Fariin ka socota Xogyahaha DCYF](#)
 - [Sidee Ayaynu Nahay?](#)
-

Foolka-Fool, Tobobarka Neefka Saarida (Cardiopulmonary resuscitation, CPR) Ee Loo Baahan Yahay

Safmarka dartiis, DCYF waxa ay hakisay qaybaha foolka-foolka/gacanta laga qabanayo ee loogu baahan yahay tobobarka Foolka-Fool, Tobobarka Neefka Saarida (Cardiopulmonary resuscitation, CPR) 2021.

Tani iminka **ma jirto** oo qaybaha foolka-foolka ah/gacanta laga qabanayo ee loogu baahan yahay tobobarka CPR **waa** in la buuxiyaa si loo buuxiyo shuruudaha CPR.




Baro talaabooyinka looga baahan yahay shaqaalaha hore iyo shaqaalaha cusub.

[Ka AKhri Fariinta Buuxda Halkan](#)

Khayraad Cusub Ayaa La Heleyaa - Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiyo (frequently asked questions, FAQ) Montessori

Miyaad ka shaqaysaa barnaamijka Montessori? Miyaad weligaa is waydiisay sida shahaadada, aqoonsiga ama dibloomada Montessori ay u buuxinayso shuruudahaaga waxbarashada liisanka?

Iyada oo la iska kaashanayo [Pacific Northwest Montessori Association](#) iyo wakiilka Montessori ee heer qaran, kooxdeena Hormarka Xirfadu waxay kuu diyaariyeen khayraad! Iyada oo laga duulayo su'aalaha waxa aanu helnay, tilmaamahan FAQ waxaa kamid ah macluumaadka ku saabsan:



- Sida shahaadooyinka, dhibcaha, iyo dhibloomooyinka Montessori ay gacan uga gaysanayaan buuxinta shuruudaha waxbarasho ee shaqada.
- Sida waxbarashada iyo tobobarka Montessori uu kuu siinayo saacado tobobar adeega ah, iyo
- Sida loo buuxinayso shuruudaha tobobarka Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha

Eeg tilmaamahan. Hadii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan iimeel ugu dir: merit@dcyf.wa.gov.

Mashruuca Wacyi Gelinta Xirfadlayaasha Taageerada Qoyska

DCYF waxay ka shaqaynaysaa shuruudaha Shahaadooyinka Shaqaalaha oo waxay diyaarinaysaa waxku oolnimo Xirfadaha Taageerada Qoyska.

Ku Saabsan Aqoonta

Shuruudaha xirfadluhu waxay sheegi doontaa aqoonta, xirfadaha, iyo awooda daruuri ah, oo waxaa loo isticmaali doonaa dhabada waxbarashada xirgadle ee tobobarka, waxbarashada sare, iyo xidhiidhka ku salaysan hormarka xirfada.



Ka Qayb Galka!

- Waxaanu dooni doonaa xirfadlayaal taageero qoys iyo dadka qaata adeegyada si ay wax badan uga bartaan kaalintooda si ay uga caawiso inay helaan xirfad wax ku ool ah.
- Dayrta waxa aanu bilaabi doonaa Koox Shaqo Aqoonta Taageerada Qoyska.
- Waxaa jiri doonta fursad lagu eegayo oo lagu bixinayo fikirka alaabaaadka ee ay sameeyeen kooxda shaqo.

U diyaar garaw macluumaad kale oo tan ah. Waxa aanu bayaaminaynaa qaababka aad ugaga qayb geli karto wargeyskeena ([iska duwaan geli halkan](#)) iyo [websaytkeena](#)!

Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Labada Luuqadood

"Barashada labada luuqadood waxay gebi ahaanba muhiim u tahay barida tanaasulka, qadarinta iyo la socodka dhaqamada kale. In lala kulmo dhaqano kale si aragtida qofka loo balaadhiyo." -*Odhaan laga hayay qoys degan badhtamaha WA.*

Dadaalka bixiyayaasha, cida la iska kaashado, dadka danta ka leh, wakiilada qabaa'ilka, iyo xirfadlayaasha kale, waxaa la soo gunaanaday ku celinta Heerarka Labada Luuqadood ee kowaad!

"Waad ku mahadsan tahay inaad nala shaqaysa inta uu socday nidaamkani. Kooxdan waxaa aan ka bartay wax badan oo waxay ahayd isku imaatin wanaagsan" (Xubin Kooxda Latalinta)

Washington waxaa weeye gobolka 10^{aad} ee ku biiray [WIDA \(Nashqada iyo Qiimaynta Waxbarashada Heerka Sare ah/World-Class Instructional Design and Assessment\) Ururka Sanadaha](#)

[Hore!](#) Ururka WIDA waxaa weeye iskaashi heer qaran oo u dhaxeeya gobolada oo ay ka go'an tahay fursadaha waxbarasho ee loo siman yahay ee ardayda luuqadaha badan.

Iskaashiga WIDA waxa uu siyaa DCYF agabka, khayraadka, iyo adeegyada loogu talo geley taageerada baahiyaha gaarka ah ee caruurta yaryar ee luuqadaha badan ku hadasha ee daryeelka hore iyo habdhismeedka waxbarashada.

Ka qayb gal Webinarka Gaarka ah ee Luuqadaha Badan ee Julaay wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan WIDA iyo dadaalkeena Labada Luuqadood (Dual Language, DL). **Talaatada, Julaay 26 6 galabnimo.** | [Halkan Iska Duwaan Geli](#)

Kusoo dhawaw Yolanda!

Kusoo dhawee Yolanda Arellano kooxda Hormarinta Xirfada! Yolanda iminka waxay taageeri doontaa shaqada Labada Luuqadood!

Yolanda waxay u shaqaynaysay sida Isku Duwaha Barnaamijka Labada Luuqadood ee Doorashooyinka Degmada Yakima 11 sano, oo waxay ka taageeraysay helitaanka taageerada labada luuqadood ah wada shaqaynta iyo waxbarashada madaniga ah.



Ku Xidhan oo Codkaaga Hala Maqlo!

Hadii aad doonayso inaad ka qayb gasho kooxda latalinta Labada Luuqadood ee ka waramaysa shaqadan, fadlan iimeel si toos ah ugu dir [Athena Jimenez-Manalo](#).



Kooxda PD waxaa ka go'an inay qabato dadaalo wada shaqayneed oo kala duwan oo shaqadeeda ah. Si aad macluumaad badan uga ogaato dadaalkeena, booqo [websaytkeena Engagement Efforts \(Dadaalka Wada Shaqaynta\)](#).

Taageerooyinka Daryeelka Jahwareerka Laga Warqabo

Sida lagu sheegey [Sharciga Bilawga Cadaalada ah ee Caruurta \(Fair Start for Kids Act, FSKA\)](#), Department of Children, Youth, and Families ee Gobolka Washington waxay bilawday dadaal dhamaystiran oo lagu korinayo taageerada jahwareerka laga warqabo iyo ka bogsashada xirfadlayaasha caruurnimada hore.

Si loo dhiso xaalandaha ilaalinta ee caruurta Washington, Xeerka 2021 waxa uu ku hagaa DCYF inay bixiyo taageerooyinka jahwareerka laga warqabo bixiyayaasha u qalma.



Taageerada jahwareerka laga warqabo ee FSKA waxaa loo diyaarin doonaa bixiyayaasha shahaadada, liisanka haya iyo kuwa laga dhaafay, shaqaalah Barnaamijka Kaalmada iyo Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education and Assistance, ECEAP), iyo tobobarayaasha Early Achievers.

Si loo ogaato taageerooyinka jahwareerka laga warqabo ee loo baahan yahay DCYF waxay isticmaashaa nidaamkeena Nashqada Shaybaadhka oo ah qaabka ay kula shaqaysyo bixiyayaasha, oo ay ku waydiiso noocyada taageerooyinka jahwareerka laga warqabo ee caawinaya. DCYF waxay sidoo kale samaysay koox latalin farsamo oo ka kooban khabiiro mawduuca ah si ay u hagaan shaqada.

Maxaa Mudnaanta Loo Siiyay Daryeelka Jahwareerka Laga Warqabo

- Juhwareerku waxa uu keenaa khasaare bilaa aadan, hay'ad iyo dhaqaale.
- Dadka ay ku yeelato saamaynta wayn badanaa waxay galaan nidaamyada gobolka, sida caydha ilmaha, cadaalada, iyo shacabka iyo caafimaadka habdhaqanka.
- Washington, ku dhawaad sadexdii shakhsii hal ayaa yeesha ugu yaraan sadex saamayn jahwareer oo mustaqbalka ah caruurnimada hore (adverse childhood experiences, ACEs).
- Saamaynta guumaysiga iyo cunsuriyada qaabaysan waxay ku keentaa caruurta midabka ah inay si gaar ah u saamayo wakhtiga hore.

Waa maxay sababta DCYF ay u samaynayo FSKA



- Iyada oo la samaynayo nidaam wada tashi iskaashi, DCYF waxay siin doontaa guno shaqaalah shakhsiga ah ee qaata aqoonta, xirfadaha iyo waxbarashada jahwareerka laga warqabo.
- DCYF waxay sidoo kale ka shaqaynaysaa samaynta wax ku oolnimada xirfadlaho jahwareerka laga warqabo ee loo isticmaali karo in lagu ogaado xirfadaha shakhsiga ama baahiyaha hormarka waxbarashada xirfadle.
- Iyada oo laga wada shaqaynayo Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI), University of Washington Xarunta Dedejinta iyo Ka Faa'idaysiga Waxbarashada, DCYF waxay samayn doontaa tobobarka Qaabka Beeraamiidhka dhalashada-3, kaas oo bixiya qaabka xirfadlayaasha caruurnimada hore ay u korin karaan hormarka dareenka bulshada.
- DCYF waxay balaadhin doontaa tobobarka iyo agabka baadhitaanka hormarka
- Tobobarka Juhwareerka Laga Warqabo iyo Xarunta Bogsashada waxa ay hormarin doontaa oo ay ku dari doontaa Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha ee ay u baahan yihiin xirfadlayaasha waxbarashada hore.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dadaalka DCYF ee taageerada jahwareerka laga warqabo ee korninka, ku xidhan [Jess Mayerer](#).

Isku Darka Nolosha Dabiiciga ah ee Banaanka ee Ku Salaysan Waxbarashada Barnaamijkaaga Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education, ECE)



Ma doonaysaa inaad macluumaad ka ogaato waxbarashada noloshada dabiiciga ah ee banaanka ku salaysan ee barnaamijyada ECE?

Ku biir [Beeraha ilaa ECE](#) Community of Practice call *Gaynta Beerista ECE Banaanka* si aad u baadho meelaha ay iskugu yimaadaan waxbarashada Noloshada Dabiiciga ee Banaanka ku Salaysan iyo Beerta ilaa ECE. Waxaa jira labada madalood oo soo socda, mid waa Julaay oo ta kalena waa Oktoobar.

Ka dhagayso dadka soo bandhigaya ee khibrada u leh fududaynta hawlaho noloshada dabiiciga ah ku salaysan oo kala tag khayraadka aad iminka ku bilaabayo!

[**Halkan Iska Diiwaangelin!**](#)

Qoraal Dhinac: Miyaad ogtahay in DCYF ay dhawaan baahisay *Wax Ku Oolnimada Waxbarashada Noloshada Dabiiciga ah ku Salaysan ee Gobolka Washington: Badalka Daryeelka Hore iyo Xirfadlayaasha Waxbarashada?*

Kooxda PD waxay si dhaw u eegeysaa waraaqahan inta lagu jiro webinarka Wax Ku Oolnimada Waxbarashada Noloshada Dabiiciga ah Ku Salaysan. **Talaatada, Agoosto 16 6 galabnimo.** [Halkan Iska Diiwaangelin!](#)..

Hambalyo Ninder!

Kooxda Hormarka Xirfadu waxay doonaysaa inay u hambalyayo Ninder Gill, mid kamid ah Tobobarayaasha Gobolka ee La Ansixiyay iyo cida ay sida dhaw u wada shaqeeyaan, maadaama oo lagu xushay [National Conference on Race and Ethnicity](#) si ay u qaadato Sinaanta iyo Cadaalada Bilshada **Tobobarka ah!**

Mid kamid ah sadexda la bixiyay heer qaran ayaa la siiyay, waxaan ku aqoonsanaynaa kaalmada Ninder ee wanaagsan tobobare ahaan. Sadexda qaybood ee bixintu waxaa weeye Tobobarenimo, Deeq Waxbarasho iyo Wakiilka Isbadalka.

Ninder waxaa weeye xarun labada gelin ah oo ku sugan [barnaamijka Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Waqooyiga Seattle](#) halkaas oo ay diirada saarto wakhtigeeda qaabka isku darka luuqada. Dadka



kowaad ee ay la hadashaa waa bixiyayaasha waxbarashada hore, taas oo diirada lagu saaro qoysaska, iyo barnaamijyada daryeelka ilmaha.

Marka la eego qaabka dhabta ah, ee tobobarenimo, Ninder waxay dadaal badan gelisaad dhismaha shaqaalaha waxbarashada hore taas oo aan kaliya ahayn wax dhigis iyo tobobar, laakiin iyada oo siinaysa fursad waxbarashada sare ah sidoo kale.

Abaalmarinta waxaa lasoo bandhigay wakhtiga Madasha Guud ee NCORE, Khamiista, Julaay 1.

Waa Dr. William White, oo ka socda My Brother's Teacher



"Way ka badan tahay noqoshada macalin, waxay kuu tahay khad nololeed adiga, iyo waalidkaa..." ayuu ka yidhi Dr. White My Brothers Teacher (MBT).

Dr. White waxaa weeye Maamulaha My Brothers Teacher ee University of Washington iyo borofeesar gelin ka shaqeeya North Seattle College.

MBT waxa weeye barnaamij leh laba yool oo waawayn:

1. Inuu kala duwo shaqaalaha waxbarashada hore ee Seattle.
2. Inuu ka taageero fursadaha dugsiga sare ka danbeeyaa ee qaybaha waxbarashada ragada Madaw iyo Buniga ah ee Seattle.



MBT waxay doonaysaa inay kala du'do shaqaalaha waxbarashada hore iyada oo shaqaalaysiinaysa raga Madaw iyo Buniga ah ee ardayda dugsiga sare ah ee Seattle oo dhan si ay u dhamaystirtaan duruusta kuuliyada ee waxbarashada caruurnimada hore ee North Seattle College (NSC) iyo inuu siiyo tobobar xagaaga oo la maalgeliyay oo ku saabsan barnaamijyada waxbarashada hore ee Seattle.



Ka Badan Inta Aasaasiga ah...

Markii la waraysanay Dr. White, waxaa cadaatay in barnaamijkan uu ka badan yahay dadaalka kala duwanaanshaha... "Waxa aanu dhaafnaa inta aas aasiga ah, oo waxa aanu si dhab ah uga caawinaa caruurta nidaamyada waxbarashada inay dhax mushaaxaan ee aan loo samaynin caruurta midabka ah" ayuu yidhi White.

Barnaamijkan waxaa lagu eegaa dhalinyarta BIPOC (Madaw, Dhalad iyo dadka midabka ah/Black, Indigenous, and people of color) qaab wanaagsan, oo waxaa si qoto dheer diirada loogu saaraa dhismaha xidhiidhka, tobobarka iyo tobobarida ardayda yaryar inta ay wadaan go'aankooda ugu wayn. "MBT waxay buuxisaa gal dalooladaas, waxay ardayda BIPOC u heshaa kuuliyad oo waxay ka caawisaa inay wax baadhaan..."

Guulaha barnaamijka waxaa suurto geliyay shaqaalaha barnaamijka ee ay ka go'an tahay, Elana Jones iyo Clare Juico, Maamulaha Mashruuca MBT (*la sawiran Dr. White, dhanka koone bidix ee sare*).

Taariikh Ayaa Socota

Dr. White waxa ka bilaabay shahaadadiisa dhoktoreetka University of Washington 2017. Intii uu ka qayb galayay shirka New York si loo go'aamiyo mawduuca ka tegida, waxa uu ka qayb galay madal lagu eegayay macalimiinta raga Madawga ah "waan la yaabay-waxaanu isku samayn karnaa daraasad?!" ayuu yidhi White.



Waa markii Dr. White uu ogaaday in uu doonayo inuu diirada ku saaro daraasadiisa dhoktoreetka macalimiinta Madaw, laakiin maadaama oo ayna cid matalaynин gobolka Washington way ku adkaatay... markaa waxa uu go'aansaday in uu taas badalo.

Maanta marka la yimaado, barnaamijka waxa uu bilaabay laba qaybood oo 94% ardaydu ay qabatay kuuliyada.

Ardayda MBT ee dhigta North Seattle College waxay haystaan deeq waxbarasho oo buuxda iyo hal fellow oo qaypta kowaad ah oo heley deeq waxbarasho oo dhamaystiran taas oo la siiyay Kuuliyada Taariikhiiyan Madawga ah iyo Jaamacada Texas.

"Hormarka waxbarasho-waxaa jirta muraajaco marka aad ka baxayso fasalka..." ayuu yidhi Dr. White.

Waantu ku raacnay!

Si aad macluumaaad badan uga ogaato MBT booqo [websyatka Cultivate Learnings, My Brothers Teacher.](#)

Goobaha Tobobarka Cusub ee DCYF - Soo socda 2023!

Waxaa farxad noo ah in aanu bayamiyo dhaqan gelinta Nidaamka Maamulida Waxbarashada (Learning Management System, LMS) ee cusub ee dhawaan ay soo wadaan bixiyayaasha waxbarashada hore!

'Goobta Tobobarka Cusub' ee DCYF (kaas oo hadhaw laga badali doono magaca), waxay noqon doontaa meel daryeel bixiyayaasha ilmuu ka heli doonaan DHAMAAN tobobarka oo ay tobobarka onleyinka ku geli doonaan.



Maxay taasi macnaheedu tahay?

Goobta Tobobarka Cusub ee DCYF waxay badali doontaa LMS, DCYFtraining.com.

Bixiyayaasha daryeelka ilmaha waxay heli karaan tobobar la heli karo OO gebi ahaanba onleyn ah oo ku saabsan goobta Tobobarka Cusub marka la bilaabo sanadka cusub, 2023.

Hay'adaha tobobarku waxay iminka maamuli kartaa Tobobarayaasha Gobolka Ansixiyay ee goobta Tobobarka Cusub.

Tobobarayaashu waxay ka geli karaan Goobta Tobobarka Cusub liiska tobobarka, la socodka dhamaystirka, wareega maamulka, iyo xidhiidhinta hay'ada tobobarka. Waxaa weeye sidoo kale qaabka tobobarayaasha cusub ay u noqon karaan kuwo gobolku ansixiyo.

Goorma Ayuu Isbadalkani Dhacayaa?

Goobta Tobobarka Cusub ee DCYF waxay la bilaabi doonaa sanadka cusub, horaanta 2023.

Maxaa Looga Baahan Yahay Goobta Tobobarka Cusub?

Waxaa farxad noo ah in aanu bilawno nidaaka LMS ee cusub ee fududayn doona isticmaalka si loo buuxiyo baahiyaha shaqaalaheena koraya ee kala duwan.

Goobta Tobobarka Cusub ee DCYF waxay yeelan doontaa waxyaabo ka caawin doonta ardaydeena, hay'adaha tobobarka iyo tobobarayaasheenu inay helaan oo si fudud u isticmaalaan. Waxyaabaha ay leedahay waxaa kamid ah:

- Habaynta luuqada
- Fariimaha iyo wargelimaha tooska ah
- Baadhitaan fudud oo tobobarka lagu baadhayo mawduuc, goob iyo waxkale oo badan!
- Ikhtiyaaro la isku daray oo wada shaqayn oo waxbarasho, oo ay ku jiraan wada shaqaynta Zoom-ka
- Agabyo waxbarasho oo dhexe iyo laybareeriga macluumaadka waxbarashada elektorooniga ah
- Isdhaxgelinta LMS barnaamijyada DCYF ee kale oo lagu kordhinayo wax soo saarka iyo isku mid noqoshada macluumaadka
- Warbixin iyo qiimayn dabacsan
- Iisticmaal iyo gelitaan guud ahaan dhamaan oo isticmaalayaasha ah

- Maamulayaasha/maamulka barnaamijku waxay ku qori karaan ama duwaan gelin karaan shaqaalaha tobobarka
- Qaab fudud oo loo tegi karo tobobarka si foolka-fool ah

Talaabooyinka Xiga

Waxa aanu qaadaynaa qaab isticmaaluhu uu u yahay badhtan oo uu gacan ka gaysanayo u wareega LMS-ka cusub.

Inta lagu jiro talaabo kasta oo dariiqa ah, waxaanu si dhaw ula shaqayn doonaa dadka isticmaalaya nidaamkan cusub si ay wax uga ogaadaan isticmaalayaasheena si ay u bixiyaan taageerada ugu wanaagsan.

Waxa aanu abuurnay websayt u gaar ah bixinta macluumaadka ugu danbeeya ee todobaadkan. Waxaa farxad noo ah in aanu bilawno safarkeenan cusub ee waxbarashada, oo waxaa farxad noo ah in aanu adiga ku xakayno!

Goobta Tobobarka Cusub ee DCYF

Dadaalka Wada Shaqaynta Hormarka Xirfadeed (Professional Development, PDs): Ka Qayb Gal!

Koodxa PD waxaa ka go'an inay ka wada qayb geliso shacabka iyo cida danta ka leh iyo kaalada shaqooyinkeena.

Wakhtigan, kooxdeenu waxay haysaa fursado badan oo ay kaga qayb geli karaan:

- PACE (Gelitaanka Bixiyaha Sinaanta Bulshada/Provider Access to a Community Equivalent)
- Luuqado Badan/Laba Luuqadoo oo Waxbarashada Hore ah
- Barnaamijyada Tobobarka Gobolku Ansixiyay



Booqo websaytkeena Engagement Effort (Dadaalka Wada Shaqaynta) ee PD si aad wax badan uga ogaato ka qayb gal ka aaga shaqada ee kala duwan ee kooxda. Waxa aanu doonaynaa in aanu fikirkaaga dhagaysano!

Macluumaad Badan Oggow & Ka Qayb Gal

Taxanaha Webinar-ka Xagaaga



Waxa aanu haynaa taxane mashquul ah oo ay ku jiraan Macluumaaadka Ikhtiraaca iyo Wada Shaqaynta Maamulida Khatarta Hay'ada (Management Enterprise Risk Innovation and Teamwork, MERIT) ee ugu danbeeyaa, Laba Luuqadood, Waxku Oolnimo Noloshada Dabiiciga ee Banaanka Ku Salaysan, iyo Ikhtiyaaro Shaqaalaha U Qalma. Ha seegin!

- **Agoosto:** Wax Ku Oolnimada Waxbarashada Noloshada Dabiiciga ah Ku Salaysan. [Halkan Iska Diiwaangelin](#)
- **Septeembar:** Shaqaalaha U Qalma Ku Celinta - Baro Ikhtiyaaradaada. [Halkan Iska Diiwaangelin](#)

Macluumaaad dheeraad ah ayaa hoos laga helayaa...

Agoosto: Wax Ku Oolnimada Waxbarashada Noloshada Dabiiciga ah Ku Salaysan

2021, DCYF waxay noqotay hay'adii ugu horeysay ee qaran ee liisan u bixiya barnaamijyada daryeelka ilmaha banaanka, ee noloshada dabiicga ah oo ku salaysan (outdoor, nature-based, ONB).

Barnaamijka ONB waxa uu siiyaa adeegyada waxbarashada hore caruuerta iyada oo jooga meel dabiici ah oo banaanka ah oo waxa uu baraa caruuerta manhajka noloshada dabiiciga ah ku salaysan.

Xirfadlayaasha ONB waa inay leeyihiin aqoon iyo xirfad gaar ah si ay u siiso amaan, khibrad waxbarasho oo banaanka oo tayo sare.

Manhajka Waxbarashada Hore [ee Noloshada Dabiiciga ah ku salaysan ee dhawaan la baahiyay: Badalka Xirfadlayaasha Daryeelka Hore iyo Waxbarashada](#) waxaa weeye agab xirfadle oo bixiya tobobarka noocan oo kale.



Inta lagu jiro webinarka tooska ah, waxa aanu si dhaw u eegi doonaa Waxku Oolnimada ONB! Ka qayb gal oo ka oggow macluumaaad dheeraad ah hawshan farxada leh.

Talaatada, Agoosto 16 | 6 galabnimo.

Halkan Iska Diiwaangelin

Baahinta waxaa laga heli karaa [laybareeriga baahinta DCYF](#) oo Ingiriisi, Isbaanish, iyo Somali ah.

Sebteember: Shaqaalaha U Qalma Ku Celinta | Baro Ikhtiyaaradaada.

Waad garanaysaa dareenka aad dareento marka aad ogaato meesha aad qabanayso? Waxaa dhici karta in aanad garanayn meesha aad qabanayso, laakiin waxa aad ku faraxsan tahay inaad ogaato dhabadaada? Markaa, waxa aanu doonaynaa in aanu kaa caawino webinarkan dib ku celinta ah!

Nagala soo qayb gal inta aanu ka wada hadlayno [ikhtiyaarada badan](#), oo loo yaqaan 'inta u dhiganta,' si aad u buuxiso shuruudaha waxbarashada. Waxa aanu ka wada hadli doonaa ikhtiyaarada soo socda iyaga oo faahfaahsan:



- [Waxbarashada: Dhibco Kale: Kuliyada/Uruursashada Dhibcaha](#)
- [Tobobarka: Taxane Tobobar Oo Bulshada Ku Salaysan](#)
- [Khibrad: Bandhiga Waxku Oolnimada Khibrada Ku Salaysan](#)

Arbacada, Sebteember 21 | 6 galabnimo.

Halkan Iska Diiwaangelin

Miyay ku dhaafeen Webinaradii Julaay?

Siminaarada waa la duubaa oo waxay toos uga socdaan [websaytka Webinars \(Siminaarada\)](#)

Haddii aadan heli karin siminaarka aad raadineyso, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno inaan duubno oo aan soo gelino. Waxaan kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga



Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan simanaar gaar ah, iimeel u dir [Marlene White](#).

Boqo Webinarka PD

Tobobarada Gobolku Ansixiyay iyo Barnaamijyada Tobobarka

Ma waxa aad tahay tobobare mise waxa aad doonaysaa inaad wax ka ogaato barnaamijka Tobobarka Gobolka Washington Ansixiyay? Wargeyska (Newsletter) Growing the Workforce ee ugu danbeeya waxa ay u ula gurayaan Tobobarka Gobolku Ansixiyay.

Liiska dhamayskatiran ee Wargeyska (Newsletter) Workforce Newsletters waxaa laga heli karaa websaytka Wargeyska DCYF:

[Joornaalada](#)



Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada



DCYF way garanaysaa qimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada hore. Si aad ula socoto maclumaadka ugu danbeeya ee barnaamijyadan iyo khayraadka waxbarasho ee kale, booqo:

[Deeqda Waxbarashada, Gunoooyinka iyo Abaalmarinaha](#)

Deeqaha Waxbarashada Early Achievers: Sheeqooyinka Guulaha

Hambalyo Fasalka North Seattle ee 2022 ECE Grads!



"Waxa aan kamid ahaa shaqadan quruxda badan ee caawinta korniinka caruurnimada hore ee sanad iyo badh, oo runtu waxaa weeye ma qoomameeyo ilbidhiqsi." - Margarita, Barnaamijka ECE Grad

Deeqda Early Achievers ee hore, fasalkan gaarka ah ee ardayda ku hadasha Isbaanishka waxay ku qalin jabiyeen Shahaadadooda Kowaad ee Waxbarashada Hore ee North Seattle College ee Barnaamijka ECE, Qaybaha Isbaanishka.

"Helitaanka shahaadadani waxay i aaminsiisay in aan gaadhi karo waxyaabo badan, oo waxay sidoo kale iga caawisay oo ay igu dhiiri gelisay in aan sii wado waxbarashadayda. Dareemida dareenkaas rabitaanka inaad wax badan ka ogaato aad ayuu u wanaagsan yahay! Gaar ahaan maadaama oo aan xaqijiyay in aan qabto shaqo wanaagsan oo caruur ah maadaama oo ay aniga muhiim ii yihiin." - Johana, Barnaamijka ECE Grad

Macluumaad badan ka oggow bayaanada ardayda halkan:

Bayaanada Ardayga

Miyaad ogtahay in North Seattle College ay bixiyo barnaamijyada dhigriiga ECE oo luuqado badan ah?

Si aad maclumaaad badan uga ogaato booqo [Kuuliyada North Seattle, Waxbarashada Caruurnimada Hore.](#)



Nala Wadaag!

Miyaad heshey lacag Early Achievers ah oo ma doonaysaa inaad wadaago sheekadaada? Wawa aad sheekadaada u dirtaa Khabirka Waxbarashadeena ECE, [Sharene Leek](#), si loogu daro wargeyska soo socda.



Deeqda Sinaanta Caruurnimada Hore ee DCYF - Iminka Furan

Arjigu iminka wuu furan yahay, oo waxa uu xidhmayaan

11:59 habeenimo.

Agoosto 16, 2022.

[Sharciga Bilawga Cadaalada ah ee Caruurta](#), ee ay ansixiyeen Xeer Dejinta Gobolka Washington ee 2021, waxa uu ku hagay DCYF qaybinta deeqda lagu taageerayo wada jirka iyo waxbarashada hore ee dhaqanka iyo luuqada ku salaysan iyo barnaamijyada taageerada caruurnimada hore iyo waalidka ee gobolka oo dhan.



Deeqda waxaa loo qaybiya Deeqda Sinaanta Caruurnimada Hore. Miyaad qabtaa wax su'aalo ah ama miyaad u baahan yahay in lagaa caawiyo dalbashada? limeel dcyf.childcaregrants@dcyf.wa.gov.

Maclumaaad Badan Ka Oggow & Dalbo

Cusboonaysiinta qabiil

Ma ogeyd in DCYF ay leedahay Xafiiska Xiriirka Qabiil ahaaneed?



- [Fariin Ka Socota Xafiiska Xidhiidhka Qabaa'ilka: Abriil 27, 2022 Wargeyska](#)
- [Fariin Ka Socota Xafiiska Xidhiidhka Qabaa'ilka: Abriil Wargeyska](#)

DCYF waxay bixisaa rukumada mowduucyo kala duwan ah. [Hubi liiska buuxa ee mawduucyada rukumashada](#).

caLaamadayso boga intarneetka ee Professional Development (horumarinta xirfadeed)

Yaanu ku dhaafin macluumaadka ugu danbeeya ee tobobarka iyo PD. Calaamadee Bogga Websaytka PD!

[Calaamadee Bogga Websaytka PD](#)

Rukumo fariimaha PD

Growing the Workforce waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha wxbarashada hore.

Wargeysa PD waxaa loogu telo geley in uu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqooyinka Hormarka Xirfadlaha ah.

[Rukumo](#)

Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa boggeena [Websaytka Wargeyska \(Newsletters\)](#).

Fariin ka socota Xogyahaha DCYF



Xog Hayaha DCYF Ross Hunter waxay la wadaagi doontaa fariimaha bishii bixiyayaasha ee macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo [waaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).

- [Wargeyska Maay](#)
- [Wargeyska Abriil](#)
- [Wargeyska Maars](#)

Hadii aad heysa wax suaalo ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiska Xidhiidhada](#).

Sidee Ayaynu Nahay?

Fadlan nala soo socodsii sida aan sameyneyno samaynta degdeg ah [sahanka saddex-su'aal ah](#).

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xidhidhaa [Marlene White](#).

